

# Holly Park Cleanup Site



Holly Park Cleanup Site

## Faalooyinka waa la aqbalay

Abril 22 - Maay 21, 2024

## Kusoo gudbi faalooyinka

**Khadka onlaynka ah:**

<https://bit.ly/Ecology-Comments-HollyPark>

## Ama boostada:

Zak Wall, LG, Site Manager  
 WA Department of Ecology  
 PO Box 330316  
 Shoreline, WA 98133-9716  
 425-758-5231

[Zak.Wall@ecy.wa.gov](mailto:Zak.Wall@ecy.wa.gov)

## Dhukumiintiga dib u eegista goobaha

<https://bit.ly/Ecology-HollyPark>

New Holly Public Library  
 7058 32<sup>nd</sup> Ave S Ste 104  
 Seattle, WA 98118  
 206-386-1905

## Ecology's NW Regional Office

15700 Dayton Ave N  
 Shoreline, WA 98133

*Fadlan wac si aad balan u qabsato:*  
 206-594-0000

## Macluumaadka goobta

Aqoonta Xarunta Goobta: 8747316  
 Aqoonsiga goobta Nadiifinta: 4040

## Dhukumiintiga aya diyaar u ah fikradaha iyo faalooyinka dadweynaha

Waaxda Deegaanka (Department of Ecology, Ecology) waxay kormeeraysaa nadiifinta Othello Square - Holly Park Cleanup Site ee ku yaala xaafada Othello. Barnaamijka Guriyaynta Bulshada ee Community Roots (Community Roots Housing) iyo HomeSight, oo ah laba urur aan macaash doon ahayn oo xaruntoodu tahay Seattle, ayaa samaynaya nadiifinta. Ecology waxay bixinaysaa maalgelinta nadiifinta iyada oo loo marayo Barnaamijka Deeqaha Nadiifinta Guryaha La awoodi karo Qiimo ahaan. Barnaamijkan wuxuu hubinayaa in goobaha "si sax ah loo nadiifiyey iyada oo la kordhinayo ka qaybgalka bulshada iyo hubinta guryaha la awoodi karo ee habraaca."

Waxaan jeclaan lahayn inaad faalooyin ka dhiibato dhukumiintiyada soo socda:

- **Wareegtada Ogolaanshaha Iibashada (Prospective Purchaser Consent Decree, PPCD):** heshiis sharci ah oo faraya iibsadaha (yaasha) inay ka hirgeliyaan nadiifinta goobta oo siisa iibsadaha (yaasha) bixinta maaliyadeed.
- **Qorshaha Ka Qaybqaadashada Dadweyne:** dhukumuunti sharaxaya sida dadku uga qayb qaadan karaan habka nadiifinta.

## Su'aalaha? Nagu soo biir bandhiga furan!

Usoo xaadir onlayn ama shakhsi ahaan inta lagu jiro bandhiga furan ee labada saacadood ah ee cuntada iyo wada sheekaysiga ku saabsan nadiifinta goobtan. Turjumaada waxaa lagu heli karaa Isbaanishka, Shiinays, Fiitnaamiis, iyo Tagalog.

### Arbaco, Maayo 8, 2024

(5:30 galabnimo-7:30 fiidnimo)

**Si shakhsi ahaaneed:** Othello – UW Commons  
 4200 S. Othello St. Suite 117  
 Seattle, WA 98118

**Khadka Onlaynka ah:** Isdiwaangali oo kusoo biir  
 Zoomka:

<https://bit.ly/Ecology-HollyPark>




## Taariikhda

Mashruucan wuxuu kaashanaya [Community Roots Housing](#) (CRH) iyo [HomeSight](#) (HomeSight). CRH was founded in 1976 to combat redlining and disinvestment in the Capitol Hill neighborhood while providing supporting services to residents throughout Seattle neighborhoods<sup>1</sup>

HomeSight waa Hay'ad Horumarinta Bulsho ahaaneed iyo Hay'ad Maaliyadeed ee Horumarinta Bulshada taasoo siisay markii ugu horeysay waxbarashada iibsashada guri iyo alaabada guryaha ee bulshooyinka dan-yarta ah ilaa 1990<sup>2</sup>

CRH iyo HomeSight ayaa isu-imanaya si ay u abuuraan "Xarunta Fursada ee Othello Square" (Mashruuc), oo ku taal 7315 Martin Luther King Jr Way South, Seattle, WA (Goobta). Waxay noqon doontaa mid ku salaysan gaadiidka, isticmaalka isku dhafan, horumarinta guriyaynta qiimo ahaan la awoodi karo oo bixisa 230 guri oo degaan ah iyo goobo bulsho. Soo bandhiga waxaa kamid ah:

- Waxay ku taal ka soo horjeedka Othello Light Rail station
- Qiyaas ahaan 74% guryaha waa la awoodi doonaa qiimo ahaan
- Guryaha la awoodi karo waxaa lagu qiimeeyaa inta u dhaxaysa 40% -80% ee dakhliga dhexdhexaadka ah (area median income, AMI)
- Goobta dabaqa koobaad waxa kamid noqon doona 22,000 square fiit oo loogu talagalay bulshada ah, Dadka Madowga ah, kuwa Dhaladka ah, iyo Dadka aan Cadaanka ahayn ay leeyihiin (Black, Indigenous, and People of Color, BIPOC), goob ganacsi oo ku siin doonta fursad dhaqaale iyada oo loo marayo waxbarashada iyo caawinta iibsadaha, ganacsiyada yaryar, barnaamijyada taageerada dhalinyarada iyo qoyska, adeegyada maaliyadeed, iyo goobaha bulshada isugu timaado.




Muuqaalka laga qaaday hawada saree e goobta

Baahida loo qabo PPCD ee goobtan waxay ka timaadaa isticmaalka taariikhiga ah ee guriga. Waxay ahayd xarun tafaariiqda laga bilaabo 1940-meeyadii ilaa 1979, shidaalka iyo xarunta kuleylinta saliida laga soo bilaabo 1960-meeyadii ilaa 1994, waxayna lahayd adeegsi ganacsi oo kale (tafaariiqda, makhaayadda, iyo raashinka). Duminta dhismooyinku waxaa la dumiyayintii u dhaxaysay 2002-2005, guryuhana way banaanayd tan iyo markaas. Hawlgaladan hore ee goobta ayaa waxay keeneen goobo ay batroolku wasakheeyay ciidda iyo biyaha dhulka hoostiisa, taas oo baaxadeeda lagu go'aamin doono baaritaanka sixitaanka.

<sup>1</sup> <https://communityrootshousing.org/>

<sup>2</sup> <https://www.homesightwa.org/>



Babka fikrad ahaaneed mashruuca (Sawirka: Weber Thompson)

## Wasakhda

Ciidda ku wasakhawday shidaalka iy o biyaha dhulka hoostiisa ku jira ayaa lagu ogaaday baaritaano hore. Qiyaasta qoto dheer ee biyaha dhulka hoostiisa ah waa 4 ilaa 7 fiit oo ka hooseeya oogada dhulka, iyadoo biyaha dhulka hoostiisa ay u qulqulayaan waqooyi-bari.

Baaritaanada ayaa laga helay wasakhooyinka soo socda ciidda iyo biyaha dhulka hoostiisa:

- Gaaska kala duwan, naaftada, iyo waxyaabaha batroolka culus ee aan burburin
- Benzene, ethylbenzene, iyo xylenes
- Arsenic (biyaha dhulka oo keliya) iyo lead (carada kaliya)

Wasakhooyinkan waxaa laga helay heerar ka sareeya sharciga nadiifinta gobolka, Xeerka Habka Xakamaynta Sunta ([Model Toxics Control Act, MTCA](#))<sup>3</sup>. MTCA waxay u baahantahay in wasakhdan la nadiifiyo.

## Maxay goobtani muhiim u tahay

Nadiifinta goobtan waxaa suurtagaliyay maalgalinta Ecology ee [Deeqaha Nadiifinta Guryaha la awoodi karo Qiimo ahaan](#)<sup>4</sup>.

Washington waxay aad ugu baahan tahay guryo la awoodi karo oo gobolka oo dhan ah. Wasakhowga, ama xitaa shakiga wasakhda, ayaa kor u qaada kharashka horumarinta guryeynta. Qiimaha sare kumadhiirigelinayo dadka dhisa dhismooyin si ay u dhistaan guryo la awoodi karo qiimo ahaan.

Marka lagu daro khataraha caadiga ah ee dib u dhiska, nadiifinta meelaha wasakhaysan waxay noqon kartaa hannaan adag oo leh khatar aad u badan. Qiimaha iyo wakhtiga la xiriira nadiifinta goobta ayaa inta badan si aan muhiimad la siinayn loo fahmay; Natiijo ahaan, goobo badan ayaa banaan ama aan la isticmaalin sanado, xitaa tobanaan sano. Taageeritanka nadiifinta guryaha la awoodi karo qiimo ahaan waxay ka caawisaa hubinta in nadiifinta la dhameeyo, ilaalinta caafimaadka bulshada iyo deegaanka.

Ecology waxay samaysay Barnaamijka Deeqaha Nadiifinta Guryaha La awoodi karo Qiimo ahaan (Affordable Housing Cleanup Grant Program, AHCGP) si ay uga caawiso horumarinta nadiifinta deegaanka ee horumarinta guryaha la awoodi karo qiimo ahaan. Deeqahani waxay dabooli karaan kharashaadka wax ka qabashada, oo ay kamid yihiin qorshaynta, baaritaanka, iyo shaqada farsamada ee loo baahan yahay si loo nadiifiyo meelaha wasakhaysan. Ujeedada Barnaamijka Deeqaha Nadiifinta Guryaha La awoodi karo Qiimo ahaan (Affordable Housing Cleanup Grant Program, AHCGP) waa in la dadajiyo nadiifinta iyo dib u dhiska goobaha wasakhaysan loona isticmaalo guri la awoodi karo lana yareeyo saamaynta kharashyada nadiifinta.

<sup>3</sup> [www.ecology.wa.gov/mtca](http://www.ecology.wa.gov/mtca)

<sup>4</sup> <https://ecology.wa.gov/Spills-Cleanup/Contamination-cleanup/Brownfields/Affordable-housing>

## Maxaa dhacaya marka xiga?

Ecology waxay tixgelin doontaa dhammaan faalooyinka la helo waxayna wax ka badeli kartaa dukumentiyada iyadoo lagu saleynayo faallooyinkaaga. Intaa kadib, Qorshaha Ka qaybgalka Dadweynaha ee PPCD iyo Dadweynaha ayaa la dhammaystiri doonaa, nadiifinta rasmiga ahna waa la bilaabi doonaa. Baaritaanka Sixitaanka iyo Daraasada Suurtogalnimada ayaa markaa la dhammaystiri doonaa. Nadiifinta ka soo baxa Baadhista Sixitaanka iyo Daraasada Suurtogalnimada waxay horseedi doontaa Qorshe Hawleedka Nadiifinta. Baaritaanka Sixitaanka iyo Daraasadda Suurto-galka ah qabyada ah iyo sidoo kale Qorshe hawsha Nadiifinta ayaa diyaar u ah fikrad ka dhiibashada iyo faallooyin dadweyne.

## Habraaca nadiifinta Ecology

MTCA waa sharciga nadiifinta deegaanka ee Washington. Waxay bixisaa shuruudaha nadiifinta goobta wasakhaysan waxayna dejisaa heerar ilaalinaya caafimaadka aadanaha iyo deegaanka. Ecology waxay ku dhaqantaa MTCA waxayna kormeertaa nadiifinta.

[Habraaca Nadiifinta MTCA](#)<sup>5</sup> ayaa loo dhameeyay isagoo ah talaabooyin (eeg garaafyada hoose) iyadoo la eegayo jadwalka isbadalka.



Habraaca nadiifinta rasmiga ah ee Washington (soo dejiso sharaxaada qoraalka<sup>6</sup>)

**Información en español** Si desea recibir una hoja informativa totalmente traducida al español, incluida información sobre una jornada de puertas abiertas con intérpretes el 8 de mayo a las 5:30 p. m., visite <http://www.bit.ly/Ecology-HollyPark>, Seattle Public Library New Holly Branch (7058 32nd Ave S Ste 104 Seattle, WA 98118), o llame al 425-533-5537 y espere a que un intérprete se una a la llamada.

**有關清理工作的中文信息** 如果您希望收到中文完整翻译的概况介绍, 包括 5 月 8 日下午 5:30 有口译员参加的开放日信息, 请登录 <http://www.bit.ly/Ecology-HollyPark>, 西雅图公共图书馆 (Seattle Public Library) New Holly 分馆 (7058 32nd Ave S Ste 104 Seattle, WA 98118), 或致电 425-533-5537, 等待口译员加入通话。

**Impormasyon sa Tagalog** Kung gusto mong makatanggap ng buong isinalin na fact sheet sa Tagalog, kabilang na ang impormasyon tungkol sa open house na may mga interpreter sa ika-8 ng Mayo ng 5:30 p.m., bisitahin ang <http://www.bit.ly/Ecology-HollyPark>, pumunta sa Seattle Public Library New Holly Branch (7058 32nd Ave S Ste 104 Seattle, WA 98118), o tumawag sa 425-533-5537 at hintayin ang isang interpreter na sumali sa tawag.

**Thông tin bằng tiếng Việt** Nếu quý vị muốn nhận tờ thông tin được dịch đầy đủ bằng Tiếng Việt, bao gồm thông tin về cuộc họp công cộng có thông dịch viên vào lúc 5:30 chiều ngày 8 tháng 5, vui lòng truy cập <http://www.bit.ly/Ecology-HollyPark>, đến Seattle Public Library Chi Nhánh New Holly (7058 32nd Ave S Ste 104 Seattle, WA 98118) hoặc gọi số 425-533-5537 và chờ thông dịch viên tham gia cuộc họp.

<sup>5</sup> <https://ecology.wa.gov/Spills-Cleanup/Contamination-cleanup/Cleanup-process>

<sup>6</sup> <https://apps.ecology.wa.gov/publications/SummaryPages/1909166.html>

Toxics Cleanup Program  
PO Box 330316  
Shoreline, WA 98133

## Nadiifinta Goobta ee Holly Park Cleanup

Dhukumiintiga aya diyaar u ah fikradaha iyo faalooyinka dadweynaha

Información en español incluida (página 4)  
有關清理工作的中文信息 (見第 4 頁)  
Impormasyon sa Tagalog (pahina 4)  
Có thông tin bằng tiếng Việt (Trang 4)

### Mudada faalada dadweynaha

Abril 22 – Maayo 21, 2024

<https://bit.ly/Ecology-Comments-HollyPark>

### Bandhig furan - Ka eeg macluumaadka bogga 1

Arbaco, Maayo 8, 2024, laga bilaabo 5:30 galabnimo.

(isku mar laoo martigaliyay si qof ahaan iyo khadka onlayn ka)

Cunto iyo cabitaano ayaa la bixiyay!

### Helitaanka Sharciga Dadka Maraykanka ee Naafada ah (Americans with Disabilities Act, ADA)

Si aad u codsato habaynta waafaqsan Sharciga Dadka Maraykanka ee Naafada ah

(Americans with Disabilities Act, ADA), kala xiriir Ecology taleefoon 425-533-5537 ama booqo [ecology.wa.gov/Accessibility](https://ecology.wa.gov/Accessibility). Adeegyada Gudbinta ama TTY kala hadal 711 ama 877-833-6341.

